



## QAABDHISMEEDKA SINAANTA GAADIIDKA SEATTLE

### Kooxda shaqada ee beesha ayaa horseed u ah dhismaha mustaqbal gaadiidka oo cadaalad iyo sinaan leh

Cunsuriyada Dawlada ka dhex jira ayaa saameyn ku yeeshay nidaamkayaga gaadiidka, Waxaan u qaadaneynaa mas'uuliyadda naga saaran joojinta si dhab ah. Kor u qaadista codadka bulshada ee aan dhaqan ahaan loo maqlin siyaasadda gaadiidka iyo hawlgallada waa baahi muhiim ah. Ilaa 2019, waxan ballan qaadnay kheyraadyo waxana aanu la shaqaynay 11 xubnood oo bulshada ka tirsan waxan hadda leenahay qaab-dhismeed oo leh in ka badan 200 oo farsamo oo diirada saaraya sinnaanta. Xubnaha matalaya dadka madaw, kuwa asaliga ah, iyo dadka midabka leh iyo bulshooyinka nugul. Waxay ku xidhan yihiin ururada maxaliga ah ee Seattle-Degmada King waxayna adeegsadaan waayo-aragnimadooda iyo aqoontooda xirfadeed si ay u aqoonsadaan tallaabooyinka lagu xallinayo caqabadaha la xiriira gaadiidka. Natiijada qaabka ayaa hagi doona ficilada shaqaalaha Waaxda Gaadiidka Seattle (SDOT) sanado badan. Waxaa nalagu sharfay dadaalka iyo wax ku biirinta kooxda shaqada ee dhexdhexeenaayo jinsiyada iyo cadaalada bulshada ee magaalada Seattle.

#### Baahida

Taariikhda siyaasadaha cunsuriga ah iyo maalgelin la'aanta waxay abuurtay sinnaan-la'aan nidaamka gaadiidkayaga. Saamaynta muddada dheer ee cunsuriyadda ayaa xaddidaysa helitaanka fursadaha iyo hantida. Natiijooyinka safarro dheer oo bulshooyinka dadka midabka leh waxaa ka mid ah marka loo eego dhiggooda dadka cadaanka sababtoo ah barakaca iyo inta badan helitaanka adeegga gaadiidka tayada sare leh. Iyadoo bulshooyinka midabka leh ay wax yar ka geystaan wasakheynta, waxay si aan qiyaas lahayn ula kulmaan saameynta wasakhada. Ku darista qaabkan cusub siyaasadaha iyo hawlgalada waaxdu waa tallaabo loo qaaday wax ka qabashada arrimahaas.

Sinnaanta waa cabbirka daaweynta caddaaladda ah, fursadaha iyo natiijooyinka qoomiyadda, jinsiga, dhakliga iyo hawlaha kale.

## Qaab-dhismeedka


Qaab-dhismeedku waa dukumeenti ka kooban laba qaybood. Waxay qeexaysaa qiyamka iyo xeeladaha haga ee qorshaha fulinta. Qorshaha hirgelinta waxa uu soconayaa 2022 ilaa 2028, iyadoo la fahamsan yahay in uu yahay dukumeenti firfircoon oo si joogto ah loo hagaajin doono, loola socon doono, lana cusbooneysiin doono.

Qaab-dhismeedku waa qalab muhiim ah gaaritaanka sinnaanta, kaas oo ah mid ka mid ah lixda qiyam ee waaxdu. Hadafkayagu waa inaan iskaashi la samayno bulshooyinka si aan u dhisno nidaam gaadiid oo siman jinsi ahaan iyo bulsho ahaanba.

Booqo mareegahayaga oo ku yaal [seattle.gov/transportation/EquityFramework](https://seattle.gov/transportation/EquityFramework) Si aad wax badan uga barato cidda ku jirta kooxda shaqada, akhri wax ku saabsan qiyamka iyo xeeladaha hagaya shaqadeena, iyo xeeladaha aan diiradda saari doono dhawrka sano ee soo socda.

Cunsurinimada hay'aduhu waa barnaamij, siyaasado, ama habraacyada oo ka shaqeeya faa'iidada dadka cadaanka ah iyo waxyeelada dadka midabka leh, badanaa si aan ula kac ahayn ama sido kale mid badheedh ah ahayn.

## HABKA SANAANTA GAADIIDKA



### Caddayn laga soo xigtay:

<https://ehp.niehs.nih.gov/doi/10.1289/EHP959>

[www.pnas.org/content/116/13/6001](http://www.pnas.org/content/116/13/6001)

[www.ncbi.nlm.nih.gov/pmc/articles/PMC7037907/](http://www.ncbi.nlm.nih.gov/pmc/articles/PMC7037907/)

[www.washington.edu/news/2021/04/28/people-of-color-hardest-hit-by-air-pollution-from-nearly-all-sources/](http://www.washington.edu/news/2021/04/28/people-of-color-hardest-hit-by-air-pollution-from-nearly-all-sources/)